Waalidiinta iyo Daryeelayaasha 2009-2010

Tuse fudud oo loogu talo galay waalidiinta iyo daryeelayaasha

Ka caawinta carruurtaada waxbarashadooda iyo kala doorashada mahnadaha

Tusahani wuxuu kuu sheegayaa arimo la xiriiro isbedelada muhiimka ay ee lagu sameeyay waxbarashada iyo tababarrada. Waxaa kale oo uu ku siinayaa tusmooyin la taaban karo oo ku saabsan sida aad uga caawin karto ilmahaaga aan qaangaarin sidii uu u qaadan lahaa xulashada saxda ah.

Isbedelada lagu sameeyay waxbarashada iyo tababarradu waxay siinayaan da'yarta manta kala doorashooyin ka badan sidii hore. Go'aan ka qaadashada wixii la sameyn lahaa waxay farxad gelin, jahowareer iyo welwelba u keeni kartaa da'yarta hisla hal waqti. Adiga ayaa ilmahaaga u yaqaan sida ugu wanaagsan waxaadna ku leedahay door muhiim ah ka caawinta sidii ay u dooran lahaayeen sida ugu wanaagsan waqtiga la joogo iyo mustaqbalka. Caddeymo ayaa muujinayo sida ay da'yartu u qiimeeyaan waxyaalaha ay waalidiintood iyo daryeelayaashoodu ku fekerayaan, xattaa haddii dhaqankoodu muujinayo taa cagsigeeda.

ISBEDELADA WAXBARASHADA IYO TABABARRADA

Danta
Dhaqaalaha dunida oo kordhayo dartii, dhalinyarada ku nool UK gudaheeda waxay u baahan doonaan xirfado heerar sare ah marka loo eego waqtiyadii la soo dhaafay. Waxbarashada iyo tababarrada waala casriyeyay si ay ula jaadqaado baahida dunidan uu isbedelku ka socdo, tanta arintan laga leeyahay waa in la hubiyo in:

- dhammaan da'yartu in ay helaan xirfadaha ay u baahan yihiin ee waxbarashada, shaqo iyo nolosha dadka waaweyn – oo ay ku jiraan Ingiriis heerkiisu sareeyo iyo xisaab
- ay jirto kala doorasho ku haboon da'yar kasta
- doorasho kasta waxay horseedeysaa xulashada qaybo lagu helayo waxbarasho iyo shaqo.

Xirfadaha Muhiimka ah
Dhammaan barnaamijyada iyo derejooyinka intooda badan hadda waxay daboolayaan xirfadaha muhiimka ah ee waxbarasho, shaqo iyo nolosha dadka waaweyn. Xirfadaha wax lagu qabto waa xirfadaha la taaban karo ee ah Ingiriiska, xisaabta iyo ICT taas oo aan isticmaalno maalin kasta hadda waxaa lagu bartaa manhajka dugsiga sare. Xirfadaha wax lagu qabto waxay qayb ka yihiin Dibloomada iyo, laga bilaabo Sibteembar 2010, GCSE iyo Apprenticeships'ka.

Horuumarka la kala dooran karo
Tallaabo lagu hubinayo in ay jiraan kala doorashooyin uu heli karo qof kasta oo da'yar ah oo ay ku jiraan:

- horuumarinta barnaamijyo waxbarasho iyo nidaamyo loogu talo galay da'yarta u baahan taageero dheeraad ah si ay u dhisaan kalsoonidooda una helaan derejooyinka aqoonta ee asaasiga ah
- xoojinta derejooyinka aqoonta ee hadda jiro sida GCSE iyo Heerka A si ay ugu haboonaadaan uguna diyaarsanaadaan waxbarashada sare iyo shaqo
- sooo saaridda Dibloomada, derejo aqooneed cusub. Taas oo leh galaasyo isku dhaf ah iyo khibrad gacanta lagu sameynayo, waxay ku haboon tahay da'yarta dhinac walba kuwaas oo xiiseeyo waxbarashada gacanta gacanta laga qabto ee nolosha la xiriirto. Waxaa loo

heli karaa Heerarka Asaasi (Foundation), Sare (Higher) iyo tan Casriga ah (Advanced). Dhammaan maaddooyinka Dibloomada lagama heli karo meel kasta hadda ilmahaagaq aan weli qaangaarinna waa in uu ka jeegareeyo dugsiga ama kuleejka si uu u ogaado wixii laga heli karo

- balaarinta Apprenticeships'ka loogu talo galay kuwa doonayowaddo ay ku helaan shaqo iyo horuumar. Apprenticeships'ku wuxuu u saamaxayaa da'yarta in helaan derejooyinka aqoonta inta ay shaqada ku jiraan. Meelaha qaarkood, Apprenticeships'ka Da'yarta ah waxaa lagu qaataa 14-16 sano jir
- damaanadqaad ah in dhammaan 16 iyo 17 sano jirku ay helaan goob ku haboon waxbarashada Damaanadda Sibteembar.

Taageero horuumarineed
Isbedelku waxaa lagu hubinayaa in dhammaan kala doorashooyinku kuu horseedayaan meel. Dhalinyaradu waxay bedeli karaan jihadooda mar dambe haddii ay sidaa doonayaan, laakiin waa in ay hubiyaan in waxyaalaha ay doortaan aysan xaddidin kala doorashadooda mustaqbalka.

Hel warar dheeraad ah
Ka eeg qaybta faahfaahsa, qadka online'ka ah ee tusahan halkan **www.connexions-direct.com/parentcarer** halkaas oo aad xattaa ka heli karto pdf iyo qayb qoraal kaliya ah oo arintan quseeyo. Waxaa kale oo aad booqataa qaybta ‘Parents’ ('Waalidiinta') iyo ‘Young people’ ('Dhalinyarada') halkan **www.direct.gov.uk**. Haddii aadan guriga kombiyuutar ku heysan, waxa aad internet ka heli kartaa maktabadda dadweynaha ama xarunta Connexions.

KA CAAWINTA CARRUURTAADA IN AY SI WANAAGSAN WAX U XUSHAAN

Macluumaadka wanaagsan ayaa ah furaha xulashada wanaagsan. Ka caawinta in ilmahaagu xulasho taabagal ah, waxaa loola jeedaa hubinta in ay garanayaan waxyaalaha ay kala dooaranayaan waxa ay yihiin iyo halka ay awooddooda iyo xiiseyntoodu ku jaan go'antahay.

Macluumaadka kala doorashada

Waxaa jiro kala doorashooyin yar marxaladda heerka 4'aad marka loo eego tan -16'aad bacdamaa maaddooyinka qaar ka mid ay qasab yihiin. Qofkasta waa in uu barto Ingiris, xisaab iyo saynis, tusaale ahaan.

Sida aad u taageeri karto ilmahaaga
Ka caawi in ay helaan intii suurtagal ah waxyaalo ku saabsan koorsooyinka iyo derejooyinka aqoonta ee la heli karo. Ku dhiiri geli:

- in ay akhriyaan macluumaadka ay ka helaan dugsiga – haddii ay dooranayaan waxyaalaha la kala doorto ee marxaladda heerka 4'aad, jeegaree in ay ogyihiin maadooyinka qasabka ah iyo kuwa laga tegi karo
- isticmaal buugyarahooda macluumaad ee qadka online'ka ah 14-19 si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fursadaha degaanka – waxay arintan ka heli karaan halkan **www.direct.gov.uk/14-19prospectus**
- sameyso su'aalaha ay qabaan oo taxan ee ku saabsan waxyaalaha la kala doorto ee ay xiiseynayaan, halka ay u horseedayaan iyo taageerada maaliyadeed ee la heli karo
- la hadal dadka garanayo waxyaalaha ay ogaanshahooda u baahan yihiin – tusaale ahaan, dadka wado dhigtana waxyaaalaha la kala doorto ee ay xiiseynayaan, macalimiintooda, isku xirayaasha mahnadaha iyo la taliyayaasha gaarka ah ee Connexions

- iska diiwaangeli kuwa tijaabiyo koorsooyinka oo booqo si aad u ogaatid in badan oo ku saabsan waxa doorashadu ka kooban tahay
- jeegaree waqtiyada ugu dambeeyo ee codsiga, gaar ahaan wixii ka horeeyo-16, bacdamaa waxyaalaha la doorto caanka ah dhaqso loo buuxiyo.

Derejooyinka aqoonta ee wanaagsanwaxay keenaan fursado shaqo oo wanaagsan, dakhli sare iyo shaqada oo sifiican loogu qanco. Shaqooyinka dadka aan derejooyinka aqoonta wadan degdeg ayay u sii baaba'ayaan. Haddii ilmahaagu go'aansanayo wixii uu sameyn lahaa 16 ka dib, ku dhiirigeli in ay xushaan doorasho ay waxbarashadoodu ku sii socon karto. Xusuusi in aysan waddo ka xirani jirin taas oo ay sabab u tahay wixii ay soo barteen, iyo in inta badan dadka da'yarta ah ay sii wataan waxbarashada ama tababarka marka ay dugsiga ka baxaan.

Awoodda iyo xiisaha

Ilmahaaga dhalinyarada ah waxay u badan tahay in ay guuleystaan haddii ay doortaan waxa ay awoodaan oo ay xiiseynayaan.

Ka caawi in ay ogaadaan awooddooda iyo xiisahooda
Ku dhiirigeli in ay ka hadlaan waxyaalaha ku saabsan:

- casharada ay aadka u jecel yihiin iyo kuwa ay aadka u neceb yihiin
- waxyaalaha ay qabtaan xilliga ay firaaqada yihiin
- waxyaalaha ay ka aaminsan yihiin casharada kala duwan
- waxa ay ka aminsan yihiin imtixaanada tijaabada ah, imtixaanada caadiga ah iyo borojectiyada gacanta laga qabto.

Waxaa kale oo lagaa doonayaa in aad kala shaqeyso howlaha la xiriir**o Xageen abbaarnaa hadda? (Which way now?)** taas oo lagu eegayo kala doorashada marxaladda heerka 4’aad, ama **Adigaa dookha iska leh (It’s your choice)** taas oo lagu eegayo kala doorashada marxaladda heerka16’aad. Haddii ay si wanaagsan fekeraan marka ay online’ka ku shaqeynayaan, ku dhiirigeli in ay isticmaalaan qaybta interactive’ka ah ee majalada halkan **www.connexions-direct.com/whichwaynow** iyo **www.connexions-direct.com/itsyourchoice**

Ka caawi in ay arkaan xiriirka ka dhexeeyo waxa ay hadda doortaan iyo waxa ay doonayaan in ay sameeyaan mustaqbalka
Ku dhiirigeli in ay ka hadlaan rejadooda iyo aragtidooda mustaqbalka iyo wixii figrado ah oo ay ka heystaan shaqada ama waxbarashada. U ballanqaad in ay tahay wax iska caadi ah haddii aysan laheyd qorshooyin degsan. Waxay wax ka dooran kraan kala doorashooyin fara badan mustaqbalka.

Haddii ay mehnad maskaxda ku hayaan, waxaa dhici karto in ay u baahdaan khibrad gaar ah, maadooyin, derejooyin aqooneed iyo heer derejo si ay u sameeyaan arintaas. Ku dhiirigeli in ay ka eegaan mehnadaha ay xiiseynayaan **jobs4u** halkan **www.connexions-direct.com/jobs4u** ayna ka eegaan waxyaalaha la isaga baahan yahay si koorso loo bilaabo buugga macluumaadka online’ka ah ee 14-19.

Si xirfadeysan ugala dood koorsooyinka aad daneyneyso
Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in aad dooneyso in aad kala doodo koorso aad is leedahay ilmahaagu:

- ma sameyn cilmi baaris ku filan
- waa ka gaabiyay ama badiyay qiyaastiisaha xiiseynta iyo awoodda maadada
- waxaa aad u saameeyay qofka ay is leeyihiin wuxuu dhigayaa koorsada, waxa ay saaxiibadii yiaahdaan ama in uu ka baqayo in uu noqdo wiilka ama gabadha kali ah ee koox ku jiro.

Taageer go'aanadooda
Haddii aadan ku waafaqsaneyn ilmahaaga doorashooda, isku day in aad si sharaf leh ugu deyso dooqood. U muuji in aad qorshooneyso in ay gaaraan meesha ugu wanaagsan bacdamaa aad aqbashay doorashadooda. Haddii waqti dambe ay u cadaato in ay go'aan qaldan qaateen, waxay u baahan doonaan taageeradaada si ay ula tacaalaan cawaaqibka.

Ku dhiirigeli in ay sameystaan qorshe xoojin ah
Waxaa laga yaabaa in ay ku adkaato in ay wada sameeyaan labo arimood oo ay doonayaan in ay sameeyaan iyadoo ay sabab u yihiin arimo badan oo la taaban karo. In ay leeyihiin qorshe xoojin ah wuxuu ka dhigaayaa kuwo dareemayo in ay weli wax ka qaban karaan wixii dhacay.

YAA KU CAAWIN KARO?

Waxa aad waydiinsan kartomacalimiinta maadooyinka iyo kuwa tutors'ka ah caawimaad. Waxaa kale oo aad la tashan kartaa dadka iyo ururada hoose. Ka raadso in badan oo kale tusaha dhameyska tiran halkan **www.connexions-direct.com/parentcarer**

La hadal la taliyayaasha Connexions ee ilmahaaga gaarka u ah
La taliyayaasha gaarka ahi waxay bixiyaan macluumaad, talo iyo tusmeyn ku saabsan koorsooyinka, fursadaha tababarrada, mehnadaha iyo arimaha kale ee quseeyo da'yarta, waalidoontaada iyo daryeelayaashooda. Waxa aad kula kulmi kartaa la taliyaha ilmahaaga dugsiga ama xarunta Connexions ee degaankaaga.

La taliyayaasha gaarka ee Connexions iyo Isku xiraha Baahida Waxbarasho ee Gaarka ah (Special Educational Needs Co-ordinators) (SENCO) ee dugsiga waxay siiyaan dhalinyarada qabto baahida waxbarasho ee gaarka ah iyo taagdarrida taageero dheeraad ah oo la xiriirto qorshayaasha xilliga kala guurk. Sanadaha 9, 10 iyo 11, oo ay barbar socoto baahi sanadeedka si loo eego qoraalka baahida waxbarasho ee gaarka ah, qorshaha kala guurka ee qaangaarka waa in isagana la horuumariyaa. Qorshaha xilliga kala guurka waa in lala sameeyo ilmaha iyadoo ubucda wadahadalka laga dhigayo waxa ay xiiseynayaan iyo waxa ay jecel yihiin in ay sameeyaan mustaqbalka, iyadoo la tixgelinayo dhammaan waxyaalaha la kala doorto iyo waalidoontaada iyo daryeelayaashooda. Xirfadlayaasha kale ee kaalinta ku leh nolosha ilmaha waa in ay iyaguna qaybtooda ka qaataan. Mar allaale marka Qorshaha xilliga Kala guurka la dejiyo, la taliyayaasha gaarka ah, ee Connexions ayaa gacan ka geysan doono in la dhaqan geliyo, taas oo ay ku jiraan dhisidda baahida taageero ee gaarka u ah ilmaha. Connexions waxay sii wadi kartaa in ay taageero bixiso ilaa laga gaarayo da'da 25.

Isticmaal Connexions Direct
Adeeggan loogu talo galay 13 ilaa 19 sano jirrada waxaa lagu bixiyaa macluumaad daalacasho degdeg ah iy taloooyin kala duwan oo la xiriiro arimo saameynayo dhalinyarada. Daacashadu waa dhanka barta internetka ama in lala xiriiro la Taliyayaasha tooska ah ee Connexions. Barta internetku waxay leedahay macluumaad la xiriiro mehnadaha **jobs4u** halka **www.connexions-direct.com/jobs4u**. La taliyayasha Connexions Direct waxay ku heli karaan dhalinyarada laga bilaabo 8da subaxnimo ilaa 2da habeenimo, todobo maalmood todobaadkii telefoon ahaan, qoraal ama email halkan **www.connexions-direct.com**

Isticmaal Directgov halkan www.direct.gov.uk
Kani waa dukaan dukaan lagu hakado oo laga helo macluumaad ku saabsan adeegyada bulshada. Daalaco qaybta 'Parents' ('Waalidiinta') iyo 'Young people' ('Dhalinyarada') si aad u hesho dhammaan macluumaadka aad u baahan tahay ee ku saabsan kala doorashada dhalinyarada, taageero maaliyadeed oo loogu talo galay waxbarashada iyo noocyada.

La xiriir Parentline Plus
Mid ka mid ah ururada mutadawiciinta ah ee taageero barnaamijka Qalabka Waalidiinta ee Wax sahlo (Parent Know How) **www.dcsf.gov.uk/parentknowhow**. Waxay ka siiyaan talo bilaash ah iyo tusmeyn waalidiinta wax kasta ee quseeyo waalidnimada. Waxaad ka wici karta qadka taageerada ee 24ka saac ah halkan **0808 800 2222** ama ka daalaco macluumaadka iyo emailka gacansiinta ah barta internetka halkan **www.parentlineplus.org.uk**

Parentline Plus xattaa waxay leeyihiin warbaahinta bulshada oo qadka online'ka ah bulshada 'school gate' ('ganjeelka dugsiga'). Booqo **www.gotateenager.org.uk** si aad wax badan u ogaato.

ARIMAHA LA XIRIIRO LACAGAHA

Waxbarashadu waxay muhiim u tahay guusha mustaqbalka ilmahaaga, waana in uusan welwelka lacageed ka joojin waxbarashada. Haddii ay ka weyn yihiin 16, waxaa daa hici karto in ay helaan taageero maaliyadeed. Tusaale ahaan, waxay gacansiin ka heli karaan:

- Kharashaadka waxbarasho-maalmeedka – **Gunnada Dhowrista Waarashada (EMA)** waa qorshe ay dowladdu waddo taas oo ay ku siineyso da'yarta u qalanto ugu badnaan £30 todobaadkii si looga caawiyo in ay waxbarashada sii wataan. Lacagta ay helaan waxay ku xiran tahay dakhliga reerka laakiin ma saameyneyso manfacyada kale ee reerka
- Daryeelka carruurta – **Daryeel Waxbarasho (Care to Learn)** pwaxay bixisaa dhaqaale lagu gacansiinayo waalidiinta yaryar si ay isaga bixiyaan daryeelka carruurta inta ay waxbaranayaan
- La kulanka baahida gaarka ah ee ka imaaneyso **Dhibaatooyinka waxbarashada iyo cuuryaannimada** – waxaa jiro taageero kala duwan oo la heli karo. La taliyaa gaarka ee Connexions ee ilmahaaga ayaa kaa caawin karo ogaanshaha taageerada ilmahaagu uu heli karo
- Barashada derejooyinka aqoonta ee gaarka ah – waxaa jiro tiro **deeqo waxbarasho iyo abaalmarin waxbarasho ah** oo xaddidan oo loogu talo galay dhalinyarada dooneyso derejooyinka aqoonta ee gaarka ah ee meelaha sida qoob-ka-ciyaarka iyo riwaayadaha. Waxay ka caawiyaan kharashka nolosha iyo lacagta waxbarashada ee aysan daboolin lacagta dowladda
- Kharashka waxbarashada dheeraadka ah – dugsiyada iyo kuleejyada waxay helaan **lacagta taageerada discretionary'ga** si loo caawiyo ardayda 16-ka ka dib kuwaas oo aadka ugu baahan taageero maaliyadeed. Saraakiisha Taageerada Ardayda (Student Support Officers) ee dugsiga iyo kuleejka ayaa bixin karo macluumaad dheeraad ah
- Waxbarashada sare – dhalinyaradu waxay heli karaan **lacago iyo deymo dib loo bixin karo** oo isku dhaf ah. Lacagta ay helayaan waxay ku xiran tahay dakhliga qoyska.

Hel warar dheeraad ah
Wixii warar dheeraada ah ee ku saabsan taageerada maaliyadeed ee la heli karo booqo **www.direct.gov.uk/moneytolearn** and **www.direct.gov.uk/studentfinance**

MAXAA DHCAYO MARKA GO'AAMADA LA QAATO?

Dhowrka sano ee socdo, ilmahaagu wuxuu u baahan karaa taageero tmaaliyadeed oo ay la socoto in la maareeyo waxbarashadooda, la tacaalidda dhibaatooyinka gaarka ah iyo sameynta waxbarashada iyo kala doorashada mehnadaha.

Maareynta waxbarashada
Wax kasta oo ay doortaan, dhalinyaradu waa in ay helaan gacansiin la xiriirto isku dubaridka waxbarashadodooda, ameynta cilmi-baaristahata, ku dhameynta howlaha waqtigii loogu talo galay iyo si wanaagsan ugu celinta. Waxaad ku caawin kartaa ilmahaaga in uu ku wanaagsanaado arimahan haddii aad garaneyso sida ugu wanaagsan ee ay wax u bartaan.

Weligaa mala yaabtay sababta uu ilmahaagu u doonayo in uu miyuusikada dhegeysto, in uu kor u qayliyo ama u istaago una dhaqoaaqo marka uu waxbaranayo? Waxay noqon kartaa habka ay wax u bartaan. Qofkasta wuxuu isticmalaa aragga, maqalka iyo taabashada si ay uga caawiso waxbarashada. Qaar ayaa aad u isticmaalo hal dareen marka loo eego kuwa kale tanina waxay saameysaa qaabkooda waxbarasho.

Waxbartayaasha ku tiirsan aragga • waxay qortaan qoraalo badan oo faahfaahsan • indhaha ayay xiraan si ay wx u xusuustaan • waxay jecel yihiin wxyaalaha midabada leh • waxay raadsadaan wax ay daawadaan markay caajisaan	**Haddii ilmahaagu sidan yahay, ku dhiiri geli in uu** • helo meel degan oo uu ku shaqeysto • isticmaalo midab si uu u calaamadiyo qoraalka muhiimka ah • u bedelo qoraalada iyo waxyaalaha daabacan shax, garaaf iyo masawiro
Waxbartayaasha ku tiirsan maqalka • kor ayay wax u akhristaan waxayna ka hadlaan waxbarashadooda • waxay jecel yihiin hagitaanada hadalka ah • waxay ku raaxeystaan wax u sharaxidda dadka kale • way nuxnuxeeyaan ama way isla hadlaan marka ay caajisaan	**Haddii ilmahaagu sidan yahay, ku dhiiri geli in uu** • ka qaybqaato falanqeynta iyo doodaha • walxaha kor u akhriyo • ku soo celiyo dhacdooyin isagoo indhuhu u xiran yihiin • isticmaalo miyuusig, jabaqda iyo laxanada si uu wax ugu xusuusto
Waxbartayaasha ku tiirsan taabashada • waxay wax ku bartaan waqabadka • inta badan way dhaqdhaqaaqaan wayna maahsan yihiin • waxay u baahan yihiin firfircooni iyo in ay qaataan howl joojin joogto ah • dadka kale ayay arbushaan marka ay caajisaan	**Haddii ilmahaagu sidan yahay, ku dhiiri geli in uu** • dhaqdhaqaaqo oo uu isticmaalo ficillo ama ka qaybqaato howl si uu barto waxyaalaha cusub • miyuusig dhegeysto marka uu shaqeynayo • dad kale la shaqeeyo • isticmaalo midabada nuuraya si uu u calaamadiyo qoraalka muhiimka ah

La tacaalidda dhibaatooyinka qaaska ah
Marxaladaha qaarkood, dhalinyarada intooda badan waxay ka fikiraan arimo ku adkeeyo in ay la qabsadaan qaybaha kale ee noloshooda. Waad ka caawin kartaa in ay xalliyaaan arimahan adigoo:

- siinayo taageero isla marka aad garato dhibaatada – waxaa markasta wanaagsan in aad mar hore ku lug yeelato arintan intii ay daahi laheyd
- dhegeysanayo waxa ay yiraahdaan kana eegayo dhibaatada dhinaca fahamkooda
- xalka kala shaqeynayo – dad kalana ka qaybgelinayo waydiisanayana taageero kaaga timaado khibradlayaasha dugsiga, kuleejka, la taliyayaasha gaarka ah ee Connexions ee tababarrada bixiyo haddii loo baahdo
- dhiirgelinayo kalsoonidooda adigoo ka caawinayo in ay gartaan guushooda iyo horuumarka cusub ee ay gaareen
- ku dhiirigelinayo in ay fursadaha ugu wanaagsan ka faa'iideystaan sida carbinta, tababarka, shaqo khibradeed, mutadawacnimo iyo qorshayaasha sida abaalmarinta Duke of Edinburgh.

Sameynta waxbarasho dheeraad ah iyo kala doorashada mehnadaha
Da'aha 17 iyo 18, doorashooyinka ilmahaaga waa in ay ku jiraan:

- barashada derejooyinka aqooneed ee heerkeedu sareeyo ee kuleejka iyo jmaamacadda – waa in ay wax u bartaan si buuxdo ama halgelin sameeyaana koorsooyina ku saleysan maaddooyinka dhiirigelinayo fahamkooda qaybaha hay'daha wax soo saarka, ama koorsooyinka la xiriiro shaqada ee u saamaxayo in ay sameeyaan shaqo gaar ah
- in ay sanad fasax galaan – dhalinyaro badan ayaa qaato hal sano oo ay waxbarashada joojiyaan ka hor inta aysan u gudbin marxaladda xigta ee mustaqbal dhisidooda waxayna ku qarash gareeyaan shaqo ama safar
- in ay codsadaan Apprenticeship'ka
- in ay shaqo helaan – iyadoo ay la socoto tababar
- in ay iskood u shaqeystaan – iskaa u shaqeysigu waa doorasho adag sidaas darted haddii ay arintan xiiso ku heyso ilmahagaag, ku dhiirigeli in uu helo talo qof khibrad leh uu siiyo sida ugu dhaqsaha badan uguna macquulsan.

Waxaad ku caawin kartaa in ay halkan ka doortaan waxa ay doonayaan kuna dhiirigelinayo in ay ka jawaabaan seddax su'aalood:

- Halkee baan hadda joogaa?
- Maxaan doonayaa in aan noqdo?
- Sidee baan halkaa ku gaari karaa?

Inta ay kala doorashadooda ku mashquulsan yihiin, xusuusi in aqoonta lacag lagu helo. Waxaa u dhexeeyo farqi weyn oo xagga mushaarka ah dadka waxbartay iyo kuwa aan waxbaran. Haddii ay ku bilaabaan noloshooda shaqo iyagoo xirfaddoodu yartahay, shaqo mushaarkeedu yaryahay oo aan tababar laheyn, waxaa dhici karto in ay ku adkaatay in u sii gudbaan mid intaa ka wanaagsan.

Qaabab kale
Daabacaaddan waxaa lagu heli karaa Luuqadda indhoolayaasha iyo CD dhegeysi ah. Fadlan ka wac DCSF Publications halkan: **0845 602 2260** ama email u dir **connexions@prolog.uk.com** si aad nuqullo u dalbato.

Tarjumaad ayaa la heli karaa
Qayb koraal kaliya ah oo ah **Waalidiinta iyo Daryeelayaasha (Parents & Carers)** waxaa lagu heli karaa Carabi, Bengaali, Gujuraati, Hindi, jayniiska Mandarinka, Boolish, Bunjaabi, Somali, Turkish, Urduu iyo Fiitnaamiis si looga soo guuriyo barta internetka ee ah: **www.connexions-direct.com/parentcarer**

PDF iyo text oo kali ah qayb ah ayaa laga heli karaa online'ka halkan: **www.connexions-direct.com/parentcarer**. Waxaad isticmaali kartaa Kombiyuutarkaaga si aad qoraalka u wayneyso.